## SUURAT AL-FATX:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *Annagaa ku siinnay fatxi (gargaar) cad Nabiyow.*

2. *Si Eebe kuugu dhaafo waxaad hormarsatay iyo wixii dib maray oo gaf ah, Nicmadiisana kuugu taam yeelo, Jidka toosanna kuugu hanuuniyo.*

3. *Kuuna gargaaro Eebe Gargaar wayn.*

4. *Eebe waa kan ku dajiyay xasilloonida Quluubta mu'miniinta si ay Iimaan ugu siyaadsadaan Iimaankoodii, Eebaana iska leh Samaawaadka iyo dhulka Junuudda ku sugan, Eebana waa wax walba oge falsan.*

5. *si uu u galiyo mu'miniinta rag iyo haweenba Jannooyin ay dureereyso dhexdeeda Wabiyaal iyagoo ku waari, Dambigoodana wuu asturi, arrintaasuna Eeba agtiisa waxay ku tahay Liibaan wayn.*

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Suuraddan wanaagsani waxay ku soo dagtay markay Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) iyo asaxaabtiisii ka soo laabteen heshiiskii Xudeybiya, oo gaaladii Qureysheed u diideen Nabiga iyo asaxaabtiisa inay cumraystaan, fareenna inay Madiina ku noqdaan, shuruudo adagna la dhigteen inkastooy xagga daahirka aad mooddo tabar yari muslimiinta haddana waxaa ka dambeeyay khayr badan iyo fatxi, waxayna caddayn in Eebe Naasir iyo gargaare u yahay mu'miniinta, waxay kale oy ku tusin in jidka toosan lagu sugnaado, xoogna Eebaa iska leh, cirka iyo dhulkuna awooddiisay ku hoos jiraan, liibaanta kama dambaysta ahse waa saamaxaad Eebe oo la helo iyo Jannadiisa siduu mu'miniinta u ballanqaaday.

6. *iyo inuu caddibo munaafiqiinta Rag iyo Haweenba, iyo mushrikiinta (gaalada) rag iyo haweenba, Eebana u maleeyey mala xun, xumaantu korkooda ha ku wareegto, Eebana Ha u cadhoodo, hana lacnado, hana u darbo Naarta Jahannamo meel loo ahaadana iyadaa u xun.*

7. *Eebaa iska leh Junuudda ku sugan Samaawaadka iyo Dhulka, Eebana waa adkaade falsan.*

8. *Annagaa ku dirray Nabiyow adigoo marag ah, Bishaareeye Digena ah.*

9. *Si aad dadow Eebe u rumaysaan iyo Rasuulkiisa uguna gargaartaan, una waynaysaan, Eebana ugu tasbiixsataan Aroor iyo Galabba.*

10. *Kuwa Nabiyow kula ballamaya waxay la ballamayaan uun Eebe, ballanna ka qaadeen, Ruuxiise burriya Naftiisa umbuu ku buriyay, Ruuxii oofiyana wuxuu Eebe kula ballamay wuxuu siin Ajri wayn.*

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***

Eebe wuxuu ugu goodiyay munaafiqiinta iyo mushrikiintaba caddibaad daran, maxaa yeelay way ka gaaloobeen waxayna u maleeyeen male xun, ciddii saas yeeshana Eebe wuu dullayn wuuna u cadhoon oo lacnadi, wuxuuna ku abaal marin Naarta Jahannamo (Eebe ha naga koriyee), Eebaana iska leh cirka iyo dhulka waxa ku sugan, Nabiga Muxammad ahna (Naxariisa iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) Eebaa soo diray si uu marag, bishaareeye, dige iyo gaadhsiiye ugu noqdo caalamka, dadkana waxaa ku waajib ah dhammaantooda inay rumeeyaan wayneeyaanna una gargaaraan, Eebana had iyo jeer, habeen iyo dharaar ku xidhnaadaan kana dhawrsadaan.

11. *Waxay kugu dhihi kuwii kaddib maray (Jahaadka ee Ree-Baadiyaha carbeed ahaa), waxaa na shuqliyay xoolahannagii iyo ahalkannagii ee Eebe noo dambi dhaaf waydii, Carrabkooda yay ka dhihi waxaan qalbigooda jirin, waxaad ku dhahdaa yaa Eebe wax idiinka hanankara hadduu dhib idinla doono, ama gargaar idinla doono Saas ma aha, ee Eebe waa ogyahay waxaad camal falaysaan.*

12. *Waxaadse u malayseen inayan Rasuulka iyo Mu'miniinta u soo noqonnaynin ehelkooda waligood, saasaana loogu qurxiyay qalbigiinna, waxaadna ahaateen kuwo halaagsamay.*

13. *Ruuxaan Eebe rumayn iyo Rasuulkiisa waxaan Gaalo u darabnay Naarta Saciiro.*

*14. Eebaa iska leh xukunka waxa Samaawaadka iyo Dhulka ku sugan, wuxuuna u dambi dhaafi cidduu doono, wuxuu ciddibi cidduu doono, waana dambi dhaafe naxariiste ah.*

***Sharaxda Suurrada ( 3 )***

Ma habboona in waqtiga Muslimiintu dagaal iyo jahaad ku jirto uu ruuxna cudur daar la'aan iska fadhiisto, isagoo ku marmarsoon in xoolihiisii iyo ehelkiisii shuqliyeen, siday faleen carabtii ree baadiyaha ahayd, oy haddana dambi dhaaf waydiistaan, arrintaanu waa carrab iyo qalbi is khilaafsan, Eebe umbaana dhib iyo dheefba hanta wax walbana og, mana aha in Rasuulka iyo mu'miniinta loo maleeyo xumaan iyo inay jabi ooyan guulaysanaynin iyagoo fayowna u soo noqonaynin ehelkoodii, Eebe iyo Rasuulkiisa ciddaan rumaynin wuxuu Eebe u darbay Naarta Saciira, cirka iyo dhulka xukunkooda Eebaa iska leh, ruuxuu doonana wuu u dambi dhaafaa, kuu doonana wuu caddibaa waana dambi dhaafe naxariista ah.

*15. Waxay idinku odhan kuwii dibmaray markaad qaniino aaddaan si aad u soo qaadataan nadaaya aan idin raacnee, iyagoo dooni inay baddalaan hadalka Eebe, waxaad dhahdaa naraaci maysaan Eebaana sidaa yidhi mar hore waxayse dhihi waad na xasdaysaan, waase kuwo aan wax kasaynin in yar mooyeen.*

*16. Waxaad ku dhahdaa Nabiyow kuwa dib maray ee Ree baadiyaha ah waxaa laydinku yeedhi kuwa xoog badan oo daran inaad la dagaallantaan intay ka islaamaan, haddaadse addeecdaan wuxuu Eebe idin siin ajri fiican, haddaadse jeedsataan saad horayba ugu jeedsateen wuu idin caddibi caddibaad daran.*

*17. Ruux Indha la' korkiisa dhib (Jahaad) ma saarra iyo ka naafada ah iyo kan buka, Ruuxiise Eebe addeeca iyo Rasuulkiisa wuxuu galin Jannooyin ay dhexdureeri Wabiyaal, Ruuxiise jeedsada wuu caddibi caddibaad daran.*

***Sharaxda Suurrada ( 4 )***

Saas oo kale ma habboona in marka muslimiintu dagaal iyo duullaan ku jirto laga fadhiisto, marka xoolo iyo qaniimo gaalada laga helana la doono in wax laga helo, saas waa inayan muslimiintu oggolaanin, maxaa yeelay Eebe kama raalli aha, in kastooy dhihi waad na xasdaysaan, maxaa yeelay waa wax ma gartayaal, waase

in la imtixaano kuwaas lana faro inay la dagaallamaan kuwa daran oo xoog badan intay ka islaamaan, hadday saas yeelaan wanaag buu Eebe siin, haddayse jeedsaddaan siday horayba ugu jeedsadeen wuu caddibi, ruuxna Eebe kuma kallifo wuxuusan karin, saas daraadeed indhoole, naafo iyo ruux buka midna dhib-dagaal ma saarra.

*18. Eebe wuu ka raalli noqday mu'miniinta markay kugula ballantamayeen Nabiyow Geedka hoostiisa, Eebana waa ogaaday waxa Quluubtooda ku sugan, wuxuuna ku dajiyay xasillooni, wuxuuna ku abaal marin fatxi (nasri) dow.*

*19. Iyo Qaniimooyin badan oy qaadandoonaan, Eebana waa adkaade falsan.*

*20. Eebana wuxuu idiin yaboohay Qaniimooyin badan ood Qaadanaysaan, Taan wuu idin hormariyay, (waa Qaniimadii khaybar), wuuna idinka reebay Gacmaha dadka (gaalada) si ay ugu noqoto mu'miniinta calaamo (Runta Nabiga) idiinkuna hanuuniyo jidka toosan.*

*21. Waxaa kale oo uu idiin dadajiyay Qaniimo kale oydaan awooddeen, Eebaana wax walba waa karaa.*

*22. Hadday idinla dirraan kuwa gaaloobay way carari (oy jabi) sokeeye iyo gargaarna heli maayaan.*

*23. Saasna waa waddadii Eebe ee u horreysay ummadihii lagay, wax badali karana ma jiro.*

***Sharaxda Suurrada ( 5 )***

Xaqa kuwa ku ballantama Eebe waa ka raalli noqdaa, sida asaxaabtii Nabiga, (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) markay kula ballantameen Xudaybiya oo Maka u dhaw, wanaag iyo xasilloonina ku abaal mariyay, Ruuxii mu'min ah oo laga helo saasna Eebe wuxuu ku abaalmarin gargaar iyo nasri iyo qaniimooyin, maxaa yeelay isagaa awood leh, Eebana waa u oofiyay ballankii mu'miniinta oo waa kii magaalada Maka ee barakaysan u soo celiyay mu'miniintii, waxaana sunnada Eebe ka mid ah in dadka xaqa ku toosan ee mu'miniinta ah ay adkaadaan, waana xaq aan la baddali karin, waase kuwee kuwaas Eebe u gargaari, waa kuwa dhab ahaan xaqa u rumeeyay una raacay.

*24. Eebe waa kan idin kala reebay (idiinna kala ilaaliyay) gaaladii markaad maka gudeheeda joogteen intuu idin makaniyay korkooda kaddib, Eebana waa arkaa waxaad camal falaysaan.*

*25. Gaaladii makaad waa kuwii masaajidka xurmaysan idinka reebay iyadooy hadyadii darbantahay inay gaadho halkii lagu xalaalaynlahaa, haddaynan jirin Rag iyo Haween mu'miniin ah (oo la nool) idinna aydaan ogayn marka aad baabi'neeysaan ayna mashaqo idin haleesho (Eebe waa idiin fasixi lahaa). Si uu u galiyo naxariistiisa cidduu doono (yuu saas u yeelay), Hadday mu'miniintu ka soocmi lahaayeen gaalada wuxuu Eebe caddibi lahaa gaalada caddibaad daran.*

*26. Xusuusta marka Eebe yeelay kuwii gaaloobay Quluubtooda islawayni iyo cadho, sidii isla waynidii iyo cadhadii jaahiliinta oo Eebe ku dajiyay xasilloonidiisii Rasuulkiisa korkiisa iyo mu'miniinta, waafajiyayna kalimada dhawrsashada (Ashahaadada iyo ballan ku sugnaanshaha), iyagaana ugu mudan kalimadaas ehelna u ah, Eebana wax walba waa ogyahay.*

***Sharaxda Suurrada ( 6 )***

Eebaa awood leh, markuu doonana wuu kala baajiyaa dagaalka mu'miniinta iyo gaalada, xigmo darteed, sidii uu ku falay Nabigii (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) iyo asaxaabtiisii iyo gaaladii ree Makaad ee ahaa kuwii ka celiyay inay Maka galaan, si ay u cumraystaan, Eebe wuu dhawraa mu'miniinta, wuuna u naxariistaa, isla wayni iyo jaahilnimana wax ma tarto ee wanaag, Eebe ka yaabid, xasillooni iyo iimaanbaa wax tara waana jidka mu'miniinta.

*27. Eebe waa u rumeeyay Rasuulka riyadiisii si dhab ah, ahaydna in mu'miniintu gali Masjidka xurmaysan hadduu Eebe doono, iyagoo aamin ah oo Timaha xiiri ama gaabin (Xajka iyo Cumrada ka dib) iyagoon cidna ka cabsanaynin, wuxuuna Eebe ogyahay waxaydaan ogayn, markaasuu yeelay galitaanka Maka ka soke Fatxi (Xudaybiya).*

*28. Eebe waa kan la diray Rasuulkiisa hanuun iyo diin xaq ah, si uu ugu sare mariyo Diimaha oo dhan, Eebaana marag ku filan.*

*29. Muxammad waa Rasuulkii Eebe, kuwa la jirana waa ku daranyihiin gaalada, dhexdoodana way isu naxariistaan, waxaad arkaysaa iyagoo*

***rukuucsan oo sujuudsan oo dalbi Deeqda Eebe iyo raalli ahaanshihiisa, Calaamadooduna wajigooday ka muuqataa, Sujuudda raadkeeda darteed, saasaana lagu tilmaamay Tawreed, Tilmaantooda injiilna waxay lamid yihiin Beer soo bixisay fiidda oo xoogaysatay oo si fiican u istaagtay layaabna galisay beertaha, si uu Eebe ugu Cadho galiyo gaalada, Eebe wuxuu u yaboohay kuwa xaqa rumeeyay camal wanaagsanna falay oo mu'miniinta ka mid ah dambi dhaaf iyo ajri wayn.***

***Sharaxda Suurrada ( 7 )***

Riyada Nabiyadu waa xaq, markuu Rasuulkuna arkay isaga asaxaabta oo dawaafi Kacbada haddana laga soo celiyay inuu Maka galo yaa dad waydiiyeen xaalkaas, markaasaa Eebe caddeeyay inay xaq noqon wayna rumoowday ru'yadii, Nabigii iyo asaxaabtiina waa galeen iyagoo aamin ah wayna dawaafeen sidii Eebe ugu yaboohay, tan kale waa in mu'miniintu isu naxariistaan dhexdooda, waase inay ku darraadaan iskana celiyaan gaalada sida Eebe tilmaamay, Nabiguna wuxuu yidhi: Mu'miniinta is jecaylkoodu iyo naxariistoodu waxay la mid tahay jidh kaliya oo hadduu gaar jirrado qaarka kale la xanuunsan lana soo jeedi.
Rasuulka Muxammad ah iyo asaxaabtiisa Kutubihii hore waa lagu tilmaamay wanaaggooda iyo is jecaylkooda iyo geesinnimadoodaba iyagoo lagu shabbahay Beer soo kacaysa, ee waa in raadkoodii la raacaa wanaaggoodiina lagu daydaa.